

# Tallaalka ka imanaya Pfizer-BioNTech oo ka yar intii la filayey

Tallaal ka yar intii la filayey ayaa Pfizer-BioNTech inooga imanaya bilaha Julaay, Ogost iyo Sebtember. Machadka Caafimaadka Dadweynaha (FHI) ayaa soo jeediyay in wax laga beddelo wakhtiga u dhexeeya cirbadaha tallaalka iyo in la isla qaadan karo tallaallada mRNA si loo yareeyo dib u dhaca ku imanaya barnaamijka tallaalka.

- Waxannu mar kasta diyaar u ahayn in ay iman karaan warar wacan ama xun oo ku saabsan tallaalka. Sabtidii ka hor nasiibdarro waxannu helnay warar xun. Tallaal aad uga yar intii la filayey ayaa Pfizer-BioNTech inooga imanaya bilaha Julaay, Ogost iyo Sebtember. Laakiin waxa islamarkaana kordhaya tallaalka ka imanaya Moderna bilaha Julaay iyo Ogost, oo xoogaa buuxin doona halkii uu ka baxay tallaalka Pfizer-BioNTech ee baaqday, ayuu yidhi Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka iyo daryeelka.

Bishan Juun waxa la filayaa in tallaal ka badan 300 000 uu toddobaad kasta ka yimaado Pfizer-BioNTech. Saddexda bilood ee soo socda waxa la qiyaasay in keliya 200 000 la keenayo toddobaad kasta.

Isugeyntii waxa imanaya tallaal 900 000 ka yar intii la filayey.

FHI ayaa maalmihii dambe daraasad ku samaysay cawaaqibka arrintani ku keeni karto barnaamijka tallaalka. Waxay soo jeediyeen in dib loogu laabto 12-kii toddobaad ee u dhexeeyay cirbadaha koowaad iyo labaad ee tallaalka. FHI waxa uu islamarkaana banaynayaa in la isla qaadan karo Pfizer-BioNTech iyo Moderna oo laga kala dhigi karo cirbadaha koowaad iyo labaad. Arrintan wax ayaa iska beddeli kara haddii la helo tallaal ka badan intii la filayey. Dawladdu waxa ay qaadatay soo jeedintaas. Wax-ka-beddelka wakhtiga u dhexeeya cirbadaha waxa la bilaabayaa hadda.

Nidaamkii degmooyinka loogu kala badin jiray tallaalka waxa la joojinayaa toddobaadka 29 oo ah sidii qorshuhu ahaa.

- Tallaalka baaqday waxa uu keenayaa in cirbadda koowaad ee lagu tallaallayo dadka ka weyn 18 dib u dhacdo ku dhawaad hal toddobaad, halka cirbadda labaad dib u dhici doonto labo toddobaad, waa marka la barbardhigo qorshaha tallaalidda ee maanta jira. Waan ogahay in isbedbeddelkan ku imanaya wakhtiga cirbahada u dhaxaynaya iyo tirada tallaalku uu dhib ku yahay degmooyinka. FHI ayaa degmooyinka siin doona talooyin ku saabsan sida ay u maarayn karaan xaaladda, waxaan mar kale uga mahadcelinayaa sida wanaagsan ee ay u wadaan hawsha balaadhan ee tallaalka ee muhiimka ah, ayuu yidhi Høie.

### **Hawsha tallaalidda ilaa hadda**

Dadku aad ayay u taageersan yihiin barnaamijka tallaalka. Maanta, ama berrito, waxa la gaadhaya hadaf muhiim ah, oo ah in 2 milyan oo qof ay qateen cirbadda koowaad ee tallaalka. Waxay ka dhigan tahay in boqolkiiba 45 dadka ka weyn 18 sanno ay qateen cirbadda koowaad.

- Qaybta dadka qaatay cirbadda koowaad ee ka weyn 65 sanno - 94,6 %
- Qaybta dadka qaatay cirbadda koowaad ee ka weyn 55 sanno - 87,6 %
- Qaybta dadka qaatay cirbadda koowaad ee ka weyn 45 sanno - 77,64 %